

Su'aalaha badanaa la iska weydiiyo Qaraarka Xalka Gabaadka

- **Waa maxay sababta ay u ansaxiyeen Gudiga waxbarashada qaraarka xalka Gabaadka ?**
Gudiga waxbarashada ayaa ansaxiyey qaraarkan si uu ugu xoojiyo xeerarka hada ka jira dugsiyada dadweynaha Minneapolis (MPS), xeerkaas oo ay ku dhaqmi doonaan oo amaana u ah dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS si ay uga dhigi lahaayeen meel nabad-galyo u ah, ardayda iyo qoysaskooda iyadoon loo eegin xaaladooda muhaajirnimo, ama asalka halka ay ka soo jeedaan, luuqadooda.
- **Ma jiri doonaan isbadalo la taaban karo kadib go'aanada gudiga waxbarashada xalintooda?**
Ma jiri doonaan isbadalo saa u badan. Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS ayaa soo jeedinaya xeerarkii iyo hab-dhaqankii horay u jiray in lala wadaago macluumaadkiisa qoysaska, shaqaalaha, ardayda, iyo xubnaha bulshada si loo hubiyo in ay xog-ogaal u yihiin xeerarka dugsiyada iyo sida habdhaqanka la xiriira laanta socdaalka iyo muhaajirnimada.
- **Maxay tahgay xeerka sinaanta waxbarashada dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS', iyo halka aan ka heli karo macluumaadka ku saabsan?**
Ujeedada xeerkaan waa in la hubiyo inay helaan ardayda dhamaantood waxbarasho simaniyada aan loo eegaynin xaaladooda socdaalnimo, ama meesha ay asalkooda ka soo jeedaaniyo luuqadooda. Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS waxaa ka go'an sidii ay guul u gaarsiin lahaayeen ardaywalba, shaqadoodu waa inay taageeraan ardayda sidii ay u gaarsiin lahaayeen xifada iyo koolejka oo ay diyaar ugu noqon lahaayeen. In badan ka ogoow xeerkeena sinaanta waxbarashada ee Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS [here](#).
- **Miyey Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS la wadaagi doonaan warbixinada xaaladaha socaalka ardayga ama dhalashada, hadii ay soo weydiisyaad wakiilka ka socda laanta socdaalka dowlada?**
Dugsiyada dadweynaha Minneapolis MPS marnaba ma ururin doonaan macluumaadka la xiriira dhalashada iyo xaaladaha socdaalka mana hirgalin doonaan in lagu qaado ardayga shariciyada laanta socdaalka.

Hadii wakiilo ka socda hay'adaha dowlada ay codsadaan wax-yaabo ku saabsan ardayga, ama qoyska, waxaa u diri doonaan xafiiska MPS Office of General Counsel. Xafiiskan General Counsel ayaa waxaa uu ku xujeeydoona in ay la imaadaan Cadeeymo sax ah oo ka timaada madax sare ama maxkamadaha si loogu ogolaado warbixinada ay raadinayaan oo quseeya ardayga ama qoyska. Waxaan u sii wadi doonaa ardaydeena meel waxbarasho iyo nabadgalyo soo dhaweyn u leh Dhamaan ardaydeena iyo qoysaskooda.
- **Hadii uu dareemo ardayga ama qoyska in uu ku xadgudbay ruux ka mid ah shaqaalaha MPS, oo uu weydiiyo dhalashada ama xaalada socdaalka, yey u caban karaan arintaan oo ay taageero kaga heli karaan?**
Dugsiyada dadweynaha Minneapolis waxaa ka go'an amaanka iyo fayo-qabka ardayda oo dhan in la hubiyo lana ilaaliyodhismayaasha degmadu waa meelo soo dhaweyn leh amaana u ah dhamaan ardayda iyo qoysaskooda. Hadiise arday ama qoys uu dareensan yahay in uu qof ka mid ah shaqaalaha ku xadgudbay, waa in si deg-deg ahloola soo xiriiraa madaxda hogaanka dugsiyada ama xafiiska [MPS Office of Equality and Civil Rights](#).

Ka aqriso warbixinadaas oo dhan halkaan [here](#). Si aad u eegto Macluumaadka xeerka dugsiyada dadweynaha Minneapolis ,Booqo halkaan <http://policy.mpls.k12.mn.us/>.